HENNEPIN COUNTY
MINNESOTA

# Xasaasiyadaha Wayn ee Cuntada

## Xasaasiyadda ugu badan ee cuntada

Cuntooyinkan waaweyn ayaa ku xisaabtama xasaasiyadaha ugu badan ee cuntada:

- Lawska
- Miraha geedaha (sida yicibka, beekan (pecans), iyo lawska)
- Kalluun qolfeed (sida carsaanyo, aargoosato, iyo haar)
- Kaluun (sida salmon (nooc kalluun ah), tuuna, iyo halibut (nooc kalluun ah))
- Ukunta
- Caano
- Sooyga
- Sareenka
- Sisinta

Laga bilaabo Jan. 1, 2023, FDA waxay sisinta u aqoonsatay xasaasiyadda cuntada ee sagaalaad. Inkasta oo sisinta aan loogu magacaabin xasaasiyad ahaan xeerka cuntada ee Minnesota, shuruudaha calaamadaynta cuntada hadda waxa ku jira sisinta.

Cuntooyinkaan, iyo maado kasta oo ay ku jirto barootiin lagasoo qaatay mid kamid ah ama ka badan oo cuntooyinkaan ah, ayaa loo aqoonsadaa "xasaasiyadaha wayn ee cuntada." Tusaalayaasha maadooyinka cuntada qaar ee xasaasiyaadku ugu jiraan qayb ahaan waxaa kamid ah:

- Nacnaca
- Muraayado (Glazes)
- Maraqa
- Badalada hilibka

## Astaamaha

Astaamaha falcelinta xasaasiyada waxaa kamid ah:

- Calool xanuun
- Matag
- Finan
- Dhibaato neefsiga ah
- Barar
- Hoos u dhaca cadaadiska dhiiga
- Naxdin

Astaamahaan ayaa imaan kara isla marka ama ilaa dhawr saacadood kadib markaad maadada xasaasiyada keenta laqdo.

## Waajibaadka PIC

Arimaha la xariira maadooyinka falcelinta xaasiyada, PIC waa inuu:

- Awoodaa inuu qeexaa cuntada loo asteeyay mid leh xasaasiyadaha wayn ee cuntada.
- Waa inuu yaqaanaa astaamaha ay keenaan xasaasiyadaha wayn ee cuntada.
- Waa inuu xaqiijiyaa in shaqaaluhu qabaan tababarka badqabka cuntada, ayna ku jirto inay yaqaanaan xasaasiyada cuntada ka dhalata.

## Calaamadaynta xasaasiyad kiciye

Calaamadeynta xasaasiyadda ayaa looga baahan yahay badeecooyinka cuntada baakadaysan ee ay ku jiraan mid kasta oo ka mid ah xasaasiyadaha cuntada ee waaweyn.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Major food allergens_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

Calaamadu waa inay aqoonsataa magac ahaan xasasiyad kiciye kasta oo ku jira cuntada asagoo qayb ka ah liiska maadooyinka. Liiska waa inay sidoo kale ku jirtaa barootiinka lagasoo qaatay xasaasiyaadaha wayn ee cuntada. Adeegso mid kamid ah dookhyada calaamadaynta ee soo socda:

1. Qor magaca guud ama caanka ah ee isha cuntada, kadibna raaci magaca xasaasiyad curiyaha ood gelinayso labo qaanse dhexdood. Tusaale: burka (khamadiga), labeenta caanaha (whey) (caanaha).

**AMA**

2. Kadib markaad qorto maadada, ku dar erayga "Contains (waxaa ku jira)" adoo raacinaaya xasaasiyad curiyaha cuntada. Tusaale: Waxaa ku jira: khamadi, caano.

Miraha geedka, sheeg nooca gaarka ah ee miraha. Tusaalooyinka: Waxaa ku jira: yicibka, qunbe, beekan (pecans).

Markay yihiin kaluun ama kalluun qolfeedka, sheeg nooca noolayaasha. Tusaalooyinka: Waxaa ku jira: walleye, haar, iyo aargoosato.

# Macluumaadka

[Food Allergy Safety, Treatment, Education, and Research (FASTER) Act Overview: FDA's Perspective (https://www.youtube.com/watch?v=Bhw1rLUNRLM)](https://www.youtube.com/watch?v=Bhw1rLUNRLM)

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Major food allergens_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health